

Daweynta birta – caruurta culeyska ay ku dhasheen ka hooseeyo 2500 garaam

Caruurta ku dhalata culeys hoose waxey u baahan yihiin bir si looga hortago iney ku dhacdo bir-yaraan. Birta waxay ugu baahan yihiin caruurta si ay u koraan una kobcaan.

Daweyn

Caruurta waxa daweyntu ay u bilaabaneysaa laga bilaabo 6 todobaad ilaa iyo 6 bilood intey ka gaaraan. Dawada waxa loogu yeeraa Niferex waxana afka looga qaataa qaab goojo ah.

Jadwalka inta dawada, Niferex goojo ahaan looga qaadanayo

Culeyska iminka	Tirada dawada
1500 g – 4000 g	2 goojo, subax + habeen*
Ka badan 4000 g	3 goojo, subax + habeen*
* Haddii ilmuhu qaato caanaha naaska lagu bedelay wax ka badan bar cuntadiisa, tirada dawada waxey noqoneysaa hal mar maalin kasta.	

Qaadasho ka badan inta la qoondeeyey waxey sababi kartaa sumoowid. Haddii ilmahaagu qaato in ka badan inti loogu tala galay la xiriir mar kasta daryeelka caafimaadka, Xarunta warbixinta sunta ama 1177 Hagaha caafimaad (Vårdguiden.)